Waa Nuqul Dawli ah – lama iibin karo


| JAMHUURIYADDA | | SOMALILAND |
|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

| SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE | ألنَّشرة الرَّسمية لجمهورية صوماليلاند |
|---|---|

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA**

***E-mail:* Faafintagaryaqaanka@gmail.com**

| Sanadka: 6aad | Cadadka: 4aad ee April | Taariikh: 06/05/2017 |
|---|---|---|

**QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.**

**RUKUNKA (Subscription):**

*QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.*


## TUSMADA CADADKA


| | |
|---|---|
| **QAYBTA KOWAAD: XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANIYADDA QARANKA:** | |
| 1) **SOOMA BIXIN** | |
| **QAYBTA LABAAD: XEER MADAXWEYNE:** | |
| 2) **SOOMA BIXIN** | |
| **QAYBTA SADEXAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIIJOOYINKA DOORASHOOYINKA & BARNAAMIJYADA DAWLADA:** | |
| 3) Xeer-nidaamiyaha Maamulka Baabuurta Qaada Culayska Xad-Dhaafka ah **Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidka** | 222 |

**QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:**

4) **SOOMA BIXIN**

**QAYBTA SHANAAD: AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:**

| | |
|---|---|
| 5) Diiwaan Gelin Shirikada Online Clearance Group LTD, **Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 251 |
| 6) Diiwaan Gelin Labis Wacan Trading LTD, **Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 252 |
| 7) Diiwaan Gelin Shirikada Palm Care Pharmaceutical company, **Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 254 |
| 8) Diiwaan Gelin Global Goup of Companeis **Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 255 |
| 9) Diiwaan Gelin Shirikada M & M WORKS, **Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 256 |
| 10) Diiwaan Gelin Shirikada Mohamed Ali Dualeh Company, **Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 258 |
| 11) Diiwaan Gelin Shirikada Global Travel Services, **Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 259 |
| 12) Diiwaan Gelin Shirikada J.F.R Horn Company, **Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 260 |
| 13) Diiwaan Gelin Shirikada Scale Foodstuff Trading Company, **Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 262 |
| 14) Diiwaan Gelin Shirikada Ocean Bunkering Company LTD **Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 263 |

# QAYBTA SADDEXAAD:

## XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIIJOOYINKA DOORASHOOYINKA & BARNAAMIJYADA DAWLADA

## Jamhuriyadda Somaliland

Xeer-nidaamiyha lagu maamulayo Baabuurta qaada culayska xad dhaafka ah

Xeer Lambar ………

**Markuu Arkay:** Qodobka 4aad farqadiisa 3aad ee Xeerka Wada-marista Gaadiidka Xeer Lr. 56/2003.

**Markuu Tixgeliyay:** Talo bixintii Garyaqaanka Guud ee qaranka kuna suntanayd Tix: GGQ/X/H/09/2016

**Markuu garwaaqsaday**: In xamuulka gaadiidka si adag loo xakameeyo si loo daryeelo maalgashiga ku baxay waddooyinka, iyo in la xoojiyo habka xakamaynta xamuulka dheeraadka ah si loo ciqaabo gaadiidka qaada xamuulka dheeraadka ah.

**Markuu ku qancay:** Heerka u hogaansanaanta shuruucda xadaynta xamuulka inay tahay mid hooseysa, isla markaana wadooyinka ay ka soo gaadhayaan khasaare xamuulka xad dhaafka ah.

**Markuu garwaaqsaday**: In baabuurta xamuulka dheeraadka ah qaadaa aanay bixin qiime u dhigma khasaaraha ay waddada u geystaan.

**Markuu Ku qancay:** In sharciga hadda jiraa ee Waddo Marista Gaadiisku aanu si ku filan u daboolayn arrimaha ku saabsan xamuulka xad dhaafka ah ee gaadiidku qaado.

**Markuu arkay:** In aanay jirin meelo wax lagu miisaamo oo ku yaala goobo istaraatiiji ah kuna qalabaysan farsamooyinka casriga ah, isla markaana baahi loo qabo xeer-nidaamiye loo adeegsado qalabkaa.

Waxa uu wasiirka Hawlaha Guud Gaadiidka iyo Guriyantu halkan ku ansixiyay digreeto wasiir Xeer-nidaamiyahan hoos ku xusan:

**FIIRO GAAR AH**:

Xeer-nidaamiyahani wuxuu ka kooban yahay xakamaynta xamuulka igsalada gaadiidka kaasoo haddii la tan dhaafiyo wax yeeli kara wadada iyo amnigaba. Xeer nidaamiyuhu sidoo kale wuxuu xoojinayaa xeerka wada marista ee Somaliland Xeer No. 56

## TUSMADA XEER-NIDAAMIYAHA

### CUTUBKA 1

### QEEXITAANKA, HIMILOOYINKA IYO QABANQAABOOYINKA HAY'ADEED

1. Qeexitaan
2. Magaca Xeer-nidaamiyaha
3. Ujeeddooyinka xeer-nidaamiyaha
4. Doorka Wasiirka Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidka
5. Guddida ilaalinta culeyska igsalka ee Somaliland
6. Hawlaha guddida ilaalinta culeyska igsalka ee Somaliland

### CUTUBKA 2

### ILAALINTA CULEYSKA IGSALKA IYO CABIRKA GAADIIDKA

7 Mamnuucidda culeyska ka badan inta sharcigu baneeyey iyo cabirka la jideeyey

8 Bixinta Ganaaxyada

9 Cunaqabataynta maamul ee culeyska xad-dhaafka ah.

## CUTUBKA 3

## MAARAYNTA RARIDA BAABUURKA

10. Waajibnimada miisaamida gaadiidka

11. Shuruudaha qaadida xamuul aan caadi ahayn ama sirgaxan

12. Shuruudaha dheeriga ah ee qaadida xamuulka aan caadiga ahayn ama sirgaxan

13. Ku wareejinta Qasnada lacagta ganaaxa ee xamuulka dheeraadka ah iyo Rarka dhibka ku keenaya

## CUTUBKA 4

## SARAAKIISHA IDMAN (KORMEERAYAASHA)

14. Magacaabidda saraakiisha idman (Baadhayaasha)

16. Awoodaha sarkaalka idman (Baadhaha)

16. Joojinta baabuurka ee wadaha markuu amro sarkaalka idman (Baadhaha)

17. Wareejinta Qaybo Ka mid ah shaqada Guddida

18. Heshiisyada hay'adda

19. Mushqaayadda Wakiilada

20. Aqoonsiga shahaadooyinka miisaanka

## CUTUBKA 5

## DEMBIYADA

21. Dembiyada

## CUTUBKA 6

## QODOBO KALE

22. Wareegtada Wasiirka

## CUTUBKA 1AAD

## QEEXITAANKA, HIMILOOYINKA IYO QABANQAABOOYINKA HAY'ADEED

**Qodobka 1aad. Qeexitaan:**

**Rar aan caadi ahayn**: Waxa loola jeedaa Rar aan la kala qeybin Karin oo xajmigiisa ama culeyskiisa awgeed aan lagu rari karin baabuurta Xamuulka qaada, iyada oo aan la dhaafinayn xadkii xeer-nidaamiyuhu jideeyey waxaana ku jira rarka kontaynerada ee aan waxba u dhibayn heerarka caalamiga (ISO standard)

**Madax:** Waxaa looga jeedaa Madaxda Hay’ada Wadooyinka Somaliland

**Rarka dhibka keenaya:** Waxa loola jeedaa Rar aan la k+ala qeybin karin oo

marka baabuurta lagu raro dhaafaya culeyskii ama xajmigii sharcigu ogolaa.

**Guddi:** Waxaa loola jeedaa guddida maamulaysa hawshan

**Go'aan**: Waxaa loola jeedaa Go'aanada Guddida Maamulka ee wadooyinka Somaliland

**Xadka go'anee dhinacyada:** waxa loola jeedaa Dherar, Balac ama qoton ka baabuurta ee uu ogol yahay xeerka wadda marista xeer No 56 ama mid wasiirku dejiyay iyadoo loo eegayo baahida jirta.

**Maareeyaha Guud:** waxa loola jeedaa Maareeyaha Guud ee Hay'ada Wadooyinka Somaliland.

**Hay'ada**: waxaa loola jeedaa Hay'ada Wadooyinka Somaliland.

**Warbaahinta gudaha:** waxaa loola Jeedaa Radio Hargeysa iyo Warbaahinta Gudaha.

**Wasiir:** waxaa loola jeedaaWasiirka Wasaarada Hawlaha guud gaadiidka iyo guriyeynta ee mas'uulka ka ah arrimaha wadooyinka.

**Xadaynta qadarka lacagta laga qaadayo:** waxa loola jeedaa qadarka ganaaxa lacageed ee uu bixinayo mulkiilaha ama dareewalka baabuurka xad dhaafka u raran ee dhaafiyey iinta sharcigu xadiday:

**Wareegto:** waxaa loola jeeda Wareegtada uu soo saaray Wasiirka sida ku cad Qodobka 22aad.

**Xarunta lagu miisaamo baabuurta xamuulka ah:** waxa loola jeedaa xarun kasta oo lagu misaamo baabuurta ooy ka mid yihiin saldhigyo joogta ah ama guur guura.

**Qodobka 2aad Magaca Xeer-nidaamiyaha**

(1) Xeer-nidaamiyahan waxa loogu yeedhi doonaa Xeer-nidaamiyha Maaraynta Xamuulka ee Somaliland XEER Lr……… waxa aanu dhaqan gelayaa marka uu saxeexo Wasiirku isla markaana lagu soo saaro faafinta Rasmiga ah

(2) Nuqulka somaliga ah yaa noqon doona nuqulka rasmiga

**Qodobka 3aad. Ujeedooyinka Xeer-nidaamiyaha:**

(a) In la sameeyo awood maamul oo ilaalisa baabuurta lagu raro xamuulka xad dhaafka ah isla markaana laga qayb geliyo dhamaan daneeyayaasha go'aan ka gaadhida xadka iyo cabirka xamuulka iyo

kormeerida talaabooyin lagu xakameynayo cabirka iyo rarka xamuulka xad dhaafka ah.

(b) In laysu miisaamo dhibka ay gaadh-siiyaan wadada rarka xad dhaafka ah iyo ganaaxa lagu qaadayo gaadiidka qaada rarka xad dhaafka ah.

(c) In la sameeyo hab lagu bixiyo lacagaha laga qaado xamuulka rarka xad dhaafka ah iyo lacagaha laga qaado rarka dhibka keenaya:

**Qodobka 4aad. Doorka Wasiirka hawlaha Guud Guryeynta iyo Gaadiidka**

1.Wasiirka waa inuu si joogta ah u horumariyo una eego siyaasada qaadida xamuulka culus si loo hubiyo ujeeddooyinka ku xusan qodobka 3aad.

2. Wasiirka waxaa waajib ku ah: -
(a) In uu soo sameeyo oo daabaco siyaasad dhamaystiran oo lagu xakamanayo baabuurta rarka culus lagu raro, iyo sidoo kalena in dib u eegis ku sameeyo siyaasada, dadweynahana la ogaysiiyo iyo.

(b) Inuu u gudbiyo guddida siyaasad dhamaystiran.

(3) Wasiirka waxaa ka taageeraya hawlaha Maareeyaha Guud si loo xaqiijiyo hir-gelinta siyaasada loo xil saaray ee xeer-nidaamiyuhu awood u siiyey sida:

(a) La socodka horumarka dhaqan-gelinta siyaasada rarka culus ee xad dhaafka ah:

(b) Ka talinta iskaashiga wadamada jaarka ee arimaha la xidhiidha ama ku aadan Culayska rarka baabuurta.

(c) Kor u qaadida, kobcinta iyo la jaan qaadka shuruucda farsamo ee wadamada jaarku isticmaalaan.

(d) Ka tala bixinta, dib u eegista siyaasada, si loo xaqiijiyo ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahan.

(e) Abuuridda gudi farsamo oo maamusha hawlaha xamuulka.

**Qodobka 5aad Gudida Somaliland u qaabilsan ilaalinta culayska rarka saran baabuurta.**

(1) Gudida Somaliland u qaabilsan ilaalinta culayska rarka gaadiidka, waxaa laga dhex unkayaa maamulka Hay'adda wadooyinka iyo wasaaradda hawlaha guud. Gudida Somaliland u qaabilsan ilaalinta culayska saran candhada baabuurka (Axle load) waxay ka kooban tahay Gudoomiyaha, Xoghayaha iyo ugu yaraan laba xubnood oo guddida maamulka ka mid ah iyo cid kasta oo ka mid ah daneeyeyaasha kale oo daruuri u ah gudashada shaqada gudida.

**Qodobka 6aad. Waajibaadka shaqo ee Gudida ilaalinta culayska rarka saaran baabuurta.**

(1) Waajibaadka shaqooyin ee Gudida Somaliland u qaabilsan ilaalinta culayska saraan candhada gaadhiga (axle load) waa: -

(a) Maamulida, hirgellinta, ilaalinta iyo fulinta culayska candhada gaadhiga.

(b) Latalinta Wasiirka

(i) Dhawridda culayska sharcigu xadiday iyo cabirka xadida dhinacyada culayska saran candhada gaadhiga: -

(ii) Ku ilaalinta xadka laxadiday ee xeerka wado-marista Qaranku ogolyahay:

(iii) Ilaalinta iyo sixitanka dhaqan galnnimada hababka heer qaran iyo heer deegaan culayska candhada (axle load).

(iv) Heerka ugu haboon ee rarka xad dhaafka ah lagu ganaaxayo iyo rarka aan caadiga ahayn iyo rarka dhibta ku keenaya wadada iyo sida dayactirka wadooyinka loogu wareejinayo lacagta kasoo baxday ganaaxa baabuurta.

(c) la socodka / kormeerka: -

(i) Guud ahaan in lagu fuliyo sharciga xamuulka xad dhaafka ah, iyo ka tala-bixinta fulinta si kor loogu qaado tayadiisa iyo (ii) Heerarka ugu haboon ee lagula dagaalamayo musuqmaasuqa

**CUTUBKA 2AAD**

**ILAALINTA CUSLAYSKA SARAAN CANDHADA IYO CABIRKA DHINACYADA GAADIIDKA.**

Waxa mamnuuc ah rarka xad dhaafka ah inta sharcigu u xadiday mooyaane ama cabirka

dhinacyada Baabuurka. Sida ku xusan qodobka 10 aad ee Xeer-nidaamiyahan qofna looma ogola in uu kaxeeyo ama dhaqaajiyo, sidoo kalena qofka leh baabuurka looma ogala in uu sababo ama iyadoo uu og yahay in la kaxeeyo oo logu wado wadooyinka, baabuur kasta oo culeyskiisa guud ama culeyska mid ka mid ah igsalkiisu uu ka badan yahay xadkii sharcigu ogolaa.

**Qodobka 7aad. Xadka Culeyska go'an ee gaadiidka sharciga uu ogal yahay**

Xadka culayska ugu badan ee candhada la saari karto : -

| Nooca Igsalka | | Tirada taayirada | Culayska ugu badan ee Igsalka la saari karo (Kg) |
|---|---|---|---|
| a | Hal Igsal ee isteerinka | 2 | 8000 |
| b | Hal Igsal | 4 | 10,000 |
| c | Laba Igsal | 8 | 16,000 |
| d | Seddex Igsal | 12 | 24,000 |

**Miisaanka guud ee gaadiidka (Tan ahaan)**

| | | |
|---|---|---|
| A | Gaadhiga le 2 candho | 18,000 |
| B | Gaadhiga le 3 candho | 24,000 |
| C | Gaadhi tareelle 3 candhoole ah | 28,000 |
| D | Gaadhiga le 4 candho | 28,000 |
| E | Gaadhi tareelle 4 candhoole | 34,000 |

| | | |
|---|---|---|
| | ah | |
| F | Gaadhi isjiid ah o 4 candhoole ah | 36,000 |
| G | Gaadhi tareelle ah o 5 candhoole ah | 42,000 |
| H | Gaadhi isjiid ah o 5 candhoole ah | 42,000 |
| I | Gaadhi tareelle ah oo 6 candhoole ah | 48,000 |
| J | Gaadhi isjiid ah oo 6 candhoole ah | 48,000 |

**Xadka culayska guud ee baabuurka xamuulka sida :**

1. Xadka culeyska guud ee baabuurka xamuulka sidaa waa 56 metric tonnes, isla markaana loo eegayo shuruudahan soo socda :

a. Tirada Igsalada baabuurku waa inaanay ka badan (7) Igsal iyadoo loo eegayo xaddigii loogu talo galay ee buuga ugu qoran.

b. Culesyka guud ee baabuurka xamuulka waa in lagu xadeeyo iyadoo lala xidhiidhinayo isku dheelitirka culeyska igsalada saaran iyadoo la isticmaalayo qaacidada loo yaqaan “the bridge formula”.

**Qodobka 8aad. Bixinta ganaaxa rarka xad dhaafka ah**

7(1) Haddii la xaqiijiyo in rarka baabuurka saarani uu dhaafay intii sharcigu xadiday, qofka leh baabuurka ama daareewalka baabuurka ayaa ka masuul ah bixinta ganaaxa lacageed ee ay maamulku u dejiyeen in lagu ganaaxo rarka xad dhaafka ah ee baabuurka.

**<u>Inta ugu yar ee Xamuulka xad dhaafka ah la ganaaxayo</u>**

| Qiyaasta Culeyska dheeraadka ah ee igsalka baabuurta | Ganaaxa ugu yar $ | |
|---|---|---|
| | Xukunka ganaaxa marka koowaad | Xukunka ganaaxa marka labaad iyo wixii ka danbeeya |
| In ka yar 1,000kg | 150,000 SL SH | 180,000 SL SH |
| In ka badan 1,000 kg kana yar 2,000kg | 200,000 SL SH | 230,000 SL SH |
| 2,000kg ama ka badan, laakiin yar 3,000kg | 250,000 SL SH | 280,000 SL SH |

| | | |
|---|---|---|
| 3,000kg ama ka badan, laakiin ka yar 4,000kg | 300,000 SL SH | 330,000 SL SH |
| 4,000kg ama ka badan, laakiin ka yar 5,000kg | 400,000 SL SH | 430,000 SL SH |
| 5,000 kg ama badan, laakiin ka yar 6,000 | 500,000 SL SH | 530,000 |
| 6, 000kg ama ka badan 7,000kg | 600,000 SL SH | 630,000 SL SH |
| 7,000kg ama ka badan, lakiin ka yar 8,000kg | 700,000 SL SH | 730,000 SL SH |
| 8,000kg ama ka badan, laakiin ka yar 9,000kg | 800,000 SL SH | 830,000 SL SH |
| 9,000kg ama ka badan, laakiin ka yar 1,000kg | 900,000 SL SH | 930,000 SL SH |
| 10,000 kg ama ka badan | 1,000000 SL SH | 1,0030,000 SL SH |

(2) Haddii la xaqiijiyo in rarka baabuurku uu dhaafay intii sharcigu xadiday, baabuurku ma sii wadan karo safarkiisa ilaa: -
(a) Rarka dheeraadka ah laysugu qaybinayo candhooyinka gaadhiga kadibna dib loo miisaamayo ama
(b) Rarka dheeraadka ah laga dejiyo, isla markaana uu bixiyo lacagta ganaaxa ah ee ku xusan qodobka 1aad.

**Qodobka 9aad. Cunaqabataynta Maamul ee Culayska Xad Dhaafka ah**

Qof kasta oo ku guuldareysta inuu u hogaaansamo sharciga, Guddigu waxay ku soo rogi kartaa xanibaad ka sokow lacagta ganaaxa ee ku xusan qodobka 8 aad iyo xanibaad la saarayo sida ku xusan qaybta 12aad.

Xanimaada la saarayo waa sidan soo socota: -

(a) joojin ku meel gaadh ah isticmaalka wadada la cayimay ama guud ahaanba wadooyinka: -
(b) Waxa la saarayaa ganaax badan iyadoo loo eegayo rarka dheeraadka ah ee uu mustaqbalka qaadi doono muddo cayiman.
(c) kala noqoshada liisanka uu ku hawl galo

## CUTUBKA 3AAD

**Qodobka 10 aad. WAAJIBAADKA MIISAAMIDA GAADIIDKA**

(1) Qofka leh ama ka shaqaynaya gaadiid ganacsi waa inuu u fududeeya shaqaalaha miisaamaya gaadiidka ee jooga goobaha loogu talogalay in lagu miisaamo gaadiidka si waafaqsan ujeedooyinka ay guddidu u cayintay.

(2) Haddii uu qof ku guuldaraysto inuu u hogaansamo farqada 1aad, Guddidu waxay ku soo rogi kartaa qofkaasi ganaax kasta oo maamul oo ku xusan qodobka 9 aad iyadoo loogu darayo ganaaxyada ku xusan qodobkan 9 aad ee Xeer-nidaamiyahan.

**Qodobka 11aad. Shuruudaha Qaaditaanka Xamuulka aan caadiga ahayn ama Rarka dhibka keenaya**

(1) Qofna ma qaadi karo xamuul aan caadi ahayn ama rar dhib ku keenaya

waddooyinka haddii aanu-

(a) Qofkaasi bixin ganaaxa xamuulka aan caadiga ahayn ama rar dhib keenaya sida ku xusan Qodobka 7aad isla markaana;

(b) Qofkaasi aanu fasax gaar ah ka haysan Guddida ama gudoomiyaha gobolka ama degmada, isla markaana qofkaasi aanay qaban shuruudaha ku qoran farqadan 2aad ee soo socdata.

(2) Qofka waxa laga horjoogsan karaa inuu Qaado xamuul dheeraad ah haddii:

(a) Xamuulka dheeraadka ahi uu ka badanyahay xadiga awooda gaadiidka loogu talogalay in lagu qaado

(b) Haddii Qof ka-

(i) Lagu leeyahay deyn lacageed oo ay ahayd inuu siiyo Guddidasi iyadoo waafaqsan qodobada Xeer-nidaamiyahan

**Qodobka 12aad. Shuruudaha dheeriga ah ee Qaadida Xamuulka Aaan Caadi ahayn ama Rarka Sirgaxan**

(1) Guddidu waxay ku soo rogi kartaa shuruudo dheeraad ah qof kasta oo qaada xamuul aan caadi ahayn, rarkaas oo dhib keenaya, shuruudaha waxa ku jirta:

(a) Inuu soo bandhigo baabuurka iyo xamuulkaba si loo miisaamo

(b) In la raaciyo ciidan ilaalo ah

(c) Inuu isticmaalo qalabka laydhka ee digniinta bixiya.

(d) Inuu sheego xiliyada uu socdaalka gelayo ama

(E) Wax kasta oo kale oo guddida ula muuqda inay lagama maarmaan u tahay badbaadada xamuulka gaadiidka saaran iyo ilaalinta wadda marista iyo deegaanka.

(2) Wasiirku waxa uu ganaax kusoo rogi karaa baabuurta isagoo u eegaya shuruudaha dheeraadka ah ee lagu soo rogay qaadida xamuulka dheeraad ka ah.

**Qodobka 13aad. Ku wareejinta Qasnada lacagta ganaaxa ee xamuulka dheeraadka ah iyo Rarka dhibka ku keenaya.**

(1) Dhamaan lacagta ganaaxa ee laga qaado xamuulka aan caadiga ahayn iyo ganaaxyada lagu soo ururiyo si waafaqsan qodobka 8 aad ee Xeer-nidaamiyahan waa in lagu shubaa qasnada xisaabaadka Hay'adda waddooyinka

(2) Guddida ayaa jaangoynaysa hanaanka maaraynta maaliyadeed iyo baadhiseed, kaa soo guddidu ama wakiiladeedu ay tahay inay ku hirgeliyaan ujeedooyinka qodobkan

(3) Wasiirku iyo Guddidu waxay u magacaabi karaan Hantidhawr madaxbanaan si uu ubaadho xisaabaadka wakiil kasta oo loo magacaabay inuu soo ururiyo lacagta ganaaxa xamuulka rarka dheeraadka sida si waafaqsan qodobada Xeer-nidaamiyahan.

## CUTUBKA 4AAD

## SARAAKIISHA LOO IGMADAY BAADHITAANKA

**Qodobka 14aad. Magacaabida Baadhayaasha**

(a) Guddidu waxay iyadoo ogaysiinaysa warbaahinta magacaabi kartaa-

(b) Shaqaale uu yeelanayo sanduuqu iyo hay'aduba

(c) Shaqaaluhu waa inuu ka ka tirsan yahay Hay'adda kaas oo qabanaya hawlaha xamuulka si waafaqsan qodobada Xeer-nidaamiyahan, waxayna noqonayan baadheyaal waxaana loo sameenayaa baadhahan ruqsan ama aqoonsi la socota magacaabista

(2) Iyadoo la raacayo qodobkan, Wasiirka Hawlaha Guud, Guriyaynta iyo Gaadiidku marka uu la tashado Wasiirka arimaha Guddaha wuxuu dejinayaa shuruudaha magacaabista iyo anshaxa mihnadeed ee looga baahan yahay Baadhayaasha

(3) Ogaysiiska la socda farqada 1aad waa inuu cadeeyaa muddada uu xilka haynayo baadhe kastaa

(4) Guddidu waa inay-

(a) Iyagoo dib-u-dhigaya baadhitaanka saraakiisha lagu eedeeyo inay ku guuldaraysteen gudashada waajibaadka saaran inay hawshooda u qabtaan sida loogu tallogallay ay baajin karaan magaacabista baadhahaasi isla markaana

(b) Marka dacwad lagu oogay ka dib lagu hello baadhahaasi danbi ku saabsan ku guuldaraysigaasi waa inay shaqada ka joojiyaan Baadhahaasi

(5) Go'aanka shaqo joojinta baadhaha ee lagu xusay qodoka 4 aad waa in lagu baahiyaa Hay'adda iyo wasaaraddaba.

**Qodobka 15aad. Awoodaha Baadhaha**

1. Baadhahu waxa uu-

a) Waydiin karaa Wadaha baabuurka inuu joojiyo gaadhiga si uu u miisaamo culayska isla markaana u baadho gaadhiga.

b) Geli karaa baabuurka

c) Baadhi karaa

(i) Xamuulkasta oo gaadhiga saaran

(ii) Xog kasta oo la xidhiidha Xamuulka gaadhiga guddaha ama dusha ka saaran

(d) Miisaami karaa gaadhiga iyo Xamuul kasta oo gudaha ama dusha ka saaran gaadhiga

(e) Inuu baadho diiwan kasta oo la xidhiidha ama looga baahan yahay inuu la socdo marka la eego shuruucda gaadiidka

(d) Inuu baadho diiwaan kasta, shay ama wax la xidhiidha gaadhiga, hawlihiisa ama xamuul kasta oo gudaha ama korka ka saaran gaadiidka

(e) Inuu su'aalo waydiiyo qof kasta oo ka shaqeeya gaadiidka oo uu qodobkani waajibinayo baadhidiisa; iyo

(f) Inuu sameeyo tijaabooyin ama waydiimo ku saabsan gaadiidka ama xamuulka uu sido

**Qodobka 16aad. Joojinta baabuurka ee wadaha markuu amro sarkaalka idman (Baadhaha)**

Wadaha baabuurku waa inuu-

1- Marka uu ka codsado baadhuhu isago u taagaya calaamadaha aqoonsiga ama

2- Haddii uu ka codsado baadhe sita ruqsadiisa baadhanimo waa inuu isla markiiba u kaxeeyaa baabuurka goobta loogu talogalay in lagu miisaamo

**Qodobka 17aad. Wareejinta Qaybo Ka mid ah shaqada Guddida**

(1) Iyadoo loo hogaansamaayo farqadda labaad ee qodobka 17aad, Guddidu waxay ku wareejin karaan qaybkasta oo ka mida hawlahooda iyagoo magacaabaya

(a) wakiil-
(b) Hay'ad kale oo dawladeed ama
(c) Qof gaara

(2) Guddidu waxay Wareejin karaan

(a) Ururinta lacagta ganaaxa xamuulka dheeraadka ah iyo rarka dhibta keenaya

(b) Hawgalka iyo dayac tirka xogta lagu ilaalinayo hanaanka maaraynta xamuul dhimista

(c) Xeerarka, hawl-galada iyo dayactirka goobaha wax lagu miisaamo

(d) Samaynta baadhid sanadeed iyo kormeer deg-dega iyo

(e) Guddashada hirgelinta shuruucda iyo hogaansamida hawlaha

(f)  Hawsha iyo hawlgallada goobaha miisaamida

(g)  Hirgelinta shuruucda iyo u hogaansamida hawlaha

(3) Xeer-nidaamiyahani ma hor istaagayo wareejinta shaqooyinka Guddida haddii aanay yeelanaynin ceshiimo taban, marka aanay shaqooyinkaasi loo guddananaynin sababo ganacsi

**Qodobka 18aad. Heshiiska Wakaaladaha**

(1) Guddidu waa inay la geli kartaa heshiis wakaaladaha si ay ugu xilsaaraan hawlkasta cida lagu sheegay qodobka 17aad

(2) Heshiiska waa inay ku jirta

(a) Xaddiga ajuurada ay tahay in laga bixiyo ganaaxa la soo ururiyay

b. habka loo ururinayo isla markaana loo bixinyo ajuurada

c. Dejinta yoolka fulineed.

d. Dhiirigelinta marka ay yoolku sii dheeraado

e**.** Yaraynta mushqaayadda marka la gaadhi waayo yoolka

f. baadhis deg-dega isla markaana joogto ah iyo

g. Waxkasta oo kale oo lagama maarmaan ah si loo gaadho ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahan.

**Qodobka 19aad. Mushqaayadda Wakiilada**

(1) Marka heshiiska lagu wareejinayo shaqooyinka la dhamystiro, Guddidu waa inay siiyaan mushqayad ku filan wakiilada taas oo la jaanqaadaysa sicirka suuqa.

(2) Heshiiska ku xusan farqada 1aad, ee ku saabsan mushqaayadda wakiilada, gudida iyo wakiilku hashiis waa inay ka gaadhaan qaabka loo siinayo mushqaayadda wakiilka ama shaqaalaha fulinaya hawsha.

**<u>Qodobka 20aad. Aqoonsi isweydaar ah oo ku saabsan ruqsadda miisaamidda</u>**

(1) Wasiirka Wasaarada Hawlaha Guud, Guriyaynta iyo Gaadiidku waxa uu heshiis la geli karaa wadan kale iyadoo la samaynayo aqoonsi isweydaar ah oo ku saabsan ruqsadaha:

Iyadoo niyada lagu haynayo in aqoonsigaasi aanu ka dulqaadaynin Sidaha Xamuulka waajibaadka ka saaran miisaamida ku xusan qodobka 9aad ee Xeer-nidaamiyahan

(2) Ma jirto qaybo ka mida qodobkan oo ka hor is taagaya sarkaalka loo igmaday baadhista inuu ka dalbado gaadiidka sida xamuulka ruqsadda ku xusan farqada 1aad, si loo sameeyo miisaamida ku xusan Xeer-nidaamiyahan.

**Qodobka 21aad. Danbiyada**

1. Qofkasta oo

(a) Ku guuldaraysta inuu bixiyo ajuurada xamuulka dheeraadka sharcigu ku waajibiyay

(b) Wax yeeleeya wadada isagoo sida xamuul saayida oo ay tahay in ajuuro laga bixiyo

(c) Ku guuldaraysta inuu gaadiidka ku miisaamo sida uu dhigayo qodobka 9aad ee Xeer-nidaamiyahahan

(d) Ku guuldaraysta inuu u hogaansamo amarrada ama tilmaamaha baadhaha sida ku xusan qodobka 15aad isla markaana

(e) Ku shaqaynaya gaadiid cabirkiisu ka weynyahay inta caadiga ah ee u qoran.

Wuxuu galay danbi waxaana lagu ganaaxayaa iyadoo loo eegayo nooca danbigiisa.

**Qodobo kala duwan**

(1) Qofkasta oo loo igmado inuu qabto awoodaha iyo waajibaadka xakamaynta miisaanka gaadiidka Jamhuuriyada Somaliland waxa uu:

(a) Si madax banaan u gudan karaa dhamaan waajibaadka iyo awoodaha uu leeyahay isagoo ku sugan wadan kale.

(b) Si madaxbanaan u gudan karaa dhamaan waaajibaadka iyo awoodaha, Somaliland gudaheeda isagoo ka wakiila qaran kale isla markaana raacaya shuruucda qarankaasi isla markaana

(c) Si madaxbanaan u gudanaya dhamaan waajibaadka iyo awoodaha qaran kale isagoo ka wakiil ah qaran kaasi sharcigiisa

2. Waajibaadka iyo awoodaha lagu sheegay farqada 1aad waa inay la socotaa awoodaha qabashada hawlkasta oo lagu xusay qodobka 14aad

Danbi kasta oo laga galo sharci dawlad kale kaasoo lagu galay meel labada wadan ka dhaxaysan oo xuduud ah waxa loo tix gelinayaa in lagu galay wadanka kale xuduudiisa.

Wasiirku wuxu si madaxbanan u kormeerayaa Gudida Somaliland u qaabilsan ilaalinta culayska saraan candhada gaadhiga.

3) Wasiirka oo kaashanaya wasiirka maaliyada, waa inuu xaqiijiyo helitaanka kharashaadka laga ururiyay ganaaxyada.

(4) Dhamaan dadka gaadiidka saarani waa inay u diyaariyaan gaadiidka meelkasta oo baabuurta lagu miisaamo oo ku taala marinka safarka. Diiditaanka la diido in la joogsado goobahaasi wax lagu miisaamo waxa ka dhalanaya ciqaab danbi, arintan fulinteedu waxay keenaysaa in gaadiidka oo dhan la miisaamo

5 Haddii gaadhi uu sido xamuul dheeraad ah, waxa uu markaba qaadayaa masuuliyada ah inuu qaybiyo xamuul kasta oo kasareeya xadka uu sharcigu ogolayahay ama inuu ka dejiyo badh si hoos loogu dhigo miisaankiisa in ka hoosaysa xadka xamuulka

sharcigu jideeyay isla markaana inuu bixiyo ganaaxa xamuulka dheeraadka ah. Hadii uu diido waa denbi ciqaab mutaysanaya.

6 Ganaaxyo maamul oo dheeraad ah ayaa lagu fulin karaa xamuul sidaha aan u hogaansamin sharciga. Hanaan ganaax kordhin ah ayaa loo isticmaali karaa iyadoo loo eegayo culayska ay keentay u hogaansami la'aantoodu, heer loo dejiyay oo la garanayo la dhaafoba waxa lagu soo rogi karaa tallaabooyin dheeraada tusaale ahaan, xayiraad ku meel gaadha iyo mid joogta ah oo ku saabsan isticmaalka marino gaara, ku soo rogida ganaaxyo heer koodu sareeyo ama in gaadhiga rarka sida ama shaqaalaha gaadiidka lagala noqdo ruqdsada

7 Qayb muhiim ah oo ka mida wax qabadka la xidhiidha maaraynta xamuul dhimista waxa ganacsi ahaan loogu wareejin karaa wakiilo haddii guddida xakamaynta xamuulka ee Somaliland ay soo jeediso in arintaa baahi loo qabo wasiirkuna ka aqbalo. Tani waxay keenaysaa in guddashasa hawlaha addagi la sii wadi karo xattaa haddi aan Guddidu aanay awoodi Karin inay guddato wax qabadkaa laf ahaantiisa. Wakiilku waxa uu noqon karaa wakiil kale oo dawladeed ama qof kasta oo gaara. Waxa la filayaa Tusaale ahaan in ciidanka Waddooyinku ay kasii mid ahaan doonaan meel marinta wax qabadka. Xeer-nidaamiyahani waxa uu keenayaa heshiis wakaaladeed si loo meelmariyo isla markaana ciidanka wadooyinku ay u guttaan hawlaha ka hor imanaya bixinta ganaaxyada. Tani waxay keenaysaa in dakhli dheeraad ah loo helo

shaqaalaha saacadaha dheeraadka ah e ay shaqeeyen si loo sameeyo adeeg 24 ka saacba ah.

**Qodobka 22aad Wareegtada Wasiirka**

(1) Wasiirku isagoo la tashanaya guddida waxa uu soo saarayaa Wareegto uu ku bedeli karo arrimahan hoos ku qoran isagoo tixraacaya wax kasta oo lagu xusay qodobada Xeer-nidaamiyahan sida:

(a) xadka sharciga ah ee xamuulka
(b) Ganaaxa xamuulka dheeraadka ah
(c) Ganaaxa xamuulka dheeraadka ah iyo ganaxa rarka aan caadiga ahayn iyo rarka dhibta ku keenaya
(c) Maaraynta maaliyadeed iyo hanaanka baadhitaanka ee ay tahay in la dabaqo si loo ururiyo isla markaana loo xisaabiyo dakhliga ka soo xarooda ganaaxa xamuulka dheeraadka ah
(c) Cabiraada gaadiidka.

(2) Wareegtada wasiirku waxay ganaaxyo kala duwan ku soo rogi kartaa xadgudiubyada marka ay timaado xadgudubyo is daba socda ama joogto ahi
(3) Awooda soo saarida wareegtada waxa ka mida awoodda xayiraadda ama wax mamnuucida tasoo noqonaysa mid abid ah ama mid shuruudi ku xidhan tahay
(4) Wasiiirku waa inuu, ka hor intaanu soo saarin wareegtada ku saabsan sharciga xadka xamuulka, xadka cabiraada gaadiidka, ganaaxa xamuulka dheeraadka ah iyo ganaaxa xamuulka dhibta

keenaya, waxa uu xadkaa iyo ganaaxyadaa ka sheegayaa warbaahinta isla markaana waxa uu siinayaaa daneeyayaaasha fursad ay ku falanqeeyaaan.

**Daneeyeyaasha lala Tashaday**

Diyaarinta Xeer-nidaamiyahan waxa lagu saleeyay wadatashi, waxa la sameeyay waraysiyo iyo dood cilmiyeedyo dhawr ah si loo qurxiyo farsamo ahaan Xeer-nidaamiyahan, Daneeyayaashii ugu muhiimsanaa ee lagala tashaday Xeer-nidaamiyahan waxa kamid ahaa

- Wasaaradda Hawlaha Guud Gaadiidka iyo Guriyaynta
- Wasaaradda Arrimaha Gudaha
- Hay’adda Horumarinta Waddooyinka
- Ururka Engineerada
- Ururka Gaadiidlayda

**Dhanka Maaliyadeed**

Samaynta Shuruucdu waxay dawladaha ku yeelataa saamayn maaliyaadeed oo culus, hawlahan imika waxa lagu fulinayaa iyadoo la raacayo miisaaniyada la ansixiyay xeer- nidaamiyuhuna waxa uu qaabaynayaa isla markaana xaqiijinayaa miisaaniyada iyo hawlaha ku xusan miisaaniyada la ansixinayo

## Dhanka Is Gaadhsiinta

Wasiirka hawlaha Guud, Gurriyaynta iyo Gaadiidka, isagoo kaashanaya Gudida waxa uu la imanayaa hanaan is gaadhsiineed oo haboon si loo ogaysiiyo daneeyayaasha dawlada iyo kuwa gaarka ah ee uu Xeer-nidaamiyahan cusubi ku yeelanayo saamaynta tooska ah.

**Cali Xassan Maxamed**

**WASIIRKA WASAARADA HAWLAHA GUUD, GURIYAYNTA IYO GAADIIDKA**

## QAYBTA SHANAAD:
## AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/137/2017. 23/04/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso. Hargaysa

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, ONLINE CLEARANCE GROUP LTD, Oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad(2) (a) Somaliland Company law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu ay saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliye.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay ONLINE **CLEARANCE GROUP LTD, Astaanteeduna tahay: -** (Map-ka aduunka oo lagu wareejiyey laba aaraw oo is dhaafaya iyo Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Rarista iyo Dejintaa (Clearance Forwarding Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Berbera, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 23/04/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL**

XIG/JSL/138/2017. 23/04/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, LABIS WACAN TRADING LTD, Oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad(2)(a) Somaliland Compony Law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland. Saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliye.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan yahay shirkada magaceedu yahay **LABIS WACAN TRADING LTD, Astaanteeduna tahay: -** (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Soo dejinta Allaabooyinka (Import) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 23/04/2017.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/139/2017. 23/04/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso. Hargeysa.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, PALM CARE PHARMACEUTICAL COMPANY.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.Y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **PALM CARE PHARMACEUTICAL COMPANY**, **Astaanteeduna tahay:**

**-** (Magaca shirkada oo uu ku dhex jiro geed timir ah masna ku wareegsan yahay), shaqadeeduna tahay soo dejinta dawooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 23/04/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/140/2017. 23/04/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso. Hargaysa

## Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, GLOBAL GROUP OF COMPANIES.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer

N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **GLOBAL GROUP OF COMPANIES Astaanteeduna tahay: -** (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay La-talinta dhinaca Maamulka Ganacsiga (Management advisory service) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 23/04/2017.

Allaa Mahad Leh.

**(Yusuuf Sh. C/lahi Kahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/141/2017. 25/04/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, M & M WORKS.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, **M & M WORKS Astaanteeduna tahay: -** (xarfaha MMK), shaqadeeduna tahay Bixinta adeegyada la dagaalanka cayayaanka (pest control service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 25/04/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Yusuuf Sh. C/lahi Kahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/142/2017. 25/04/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

### Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, MOHAMED ALI DUALEH COMPANY.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland,

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu **yahay MOHAMED ALI DUALEH COMPANY**, **Astaanteeduna tahay: -** (Magaca shirkada),

shaqadeeduna tahay Soo dejinta iyo Dhoofinta allaabooyinka (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 25/04/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Yusuuf Sh. C/lahi Kahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/144/2017. 26/04/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, GLOBAL TRAVEL SERVICES.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer

N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **GLOBAL TRAVEL SERVICES**, **Astaanteeduna tahay: -** (Xarfaha GTS), shaqadeeduna tahay Bixinta adeegyadda socdaalka hawada (Travel Tousrism Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 26/04/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Yusuuf Sh. C/lahi Kahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/145/2017. 26/04/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, J. F. R HORN COMPANY.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **J. F. R HORN COMPANY**, **Astaanteeduna tahay: -** (JACFAR), shaqadeeduna tahay Dejinta Allaaboooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 26/04/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Yusuuf Sh. C/lahi Kahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/146/2017. 26/04/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaan geliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, SCALE FOODSTUFF TRADING COMPANY.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **SCALE FOODSTUFF TRADING COMPANY**, **Astaanteeduna tahay: -** (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta iyo Dhoofinta allaabooyinka (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 26/04/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Yusuuf Sh. C/lahi Kahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/147/2017. 27/04/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaan geliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, OCEAN BUNKERING COMPANY LTD, Oo ay ku cad yihiin xubanaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Comapany law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **OCEAN BUNKERING COMPANY LTD**, **Astaanteeduna tahay: -** (Xarfaha OBC), shaqadeeduna tahay Keenista Shidaalka (Fuel Importation), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 27/04/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Yusuuf Sh. C/lahi Kahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**